

*Markatabada Dadweynaha ee Rochester way ku soo
dheweyneysaa.*

*Aad baan ugu farax sannahay in aan kuu adeegno waxaynu rajeyneynaa
in aad ka faa'ideysataan dhamaan wax yaabaha maktabada ay kuu heyso.*

**Miiska hore ee maktabad waliba waxaad ka heleysaa adeegyada
tarjumaada ee luqadahoo dhan (ayadoo talefoon loo isticmalaayo).**

Maktabada waxaa lacagtu ku baxda ugu-deeqey canshuurta dowlada hoose, canshuurtaasoo ka timid dad weynaha ku dhaqan deegankaan. Hadii aad ku nooshahay gudaha ama deegaanka Rochester waxaad maktabada ku deeqdaa canshuuraha aad bixiso. Kuwa aanan ku nooleyn agagaarahaan ama kuwa aanan heysan card-ka maktabadaha dadweynaha ee Minnesota waxaa laga codsaneyaa in ay ku deeqaan maktabada ayagoo iska bixinayaan ujro ama qarshka yar.

Isticmaalka internet-ka ama amaahsiga sheyada maktabada yaala ama buugaagta saaran ee lagu wada gaariga-buugaagta waxaad u baahan tahay in aad is diibaan gelisho si lagu siyo card-ka maktabada. Shaqaalaha maktabka ayaa ku caawin doono habka diiwaan gelinta iyo qaadashada card-ka maktabka. La'haansha card-ka maktabka waa mudnaan ama fursad gaar ahaaneed iyo mas'uuliyad. Fadlan horey u soo qaado card-ka maktabada markaad dooneyso in aad isticmaasho internet-ka maktabada ama shay aad dooneyso in aad ka amaahato maktabka. Xafid card-kaaga sida aad u xafido aqoon shaqsiyeedkaaga ama kareedit kaaryahaaga kale. Ha'na amaahin dad kale. Wax alla waxii deyn ahaan lagu qaato ayadoo la'isticmaalayo card-kaaga adigaa ka mas'uul ah in la' soo celiyo taariikhda loo qabtey. Hadii aad ka dib dhacdo woqtiga lagu qabtey waa lagu ganaaxeyaa. Hadii shaygaad amaahsatey aadan soo celinin waxaa lagu ganaxeyaa sheeygaad qaadatey bedelkiisa.

Diibaangalka maktabka wuxuu isku xiriyaa magaca maktab isticmaalaha iyo sheyga gaarka ama mawduuca shayga ku saabsan oo marwaliba uu qaato ku waasi waxaa loo qeexay in ay yihiin mid gaar ahaaneed ama qarsoodi sida u degsan sharciga Minnesota.

Hadaad su'aalo ku saabsan card-ka maktabka aad qabto ama aad u baahan tahay caawinaad sida loo isticmaalo maktabka. Fadlan weydii shaqaalaha maktabka ee fadhiyaa miisaska caawinaada.

Internetka iyo kumbiyuutarada wax lagu qorto ayaa diyaar ah.

SOOMAALIGA LA'ISU GEEYEY

Buugaagta luqada soomaaliga waxaad ka heleysaa qebta luqadaha ajaanibta (Majaladaha aktooda) ee dabaqa labaad. Waxaa kaloo jirta gabayada Soomaalida qaar la'xuley ku waasoo ku duuban jiiro-digsi ama saxanka muusikada. Heesaha Soomaalida oo jiiro-digsi ku duuban waxaad ka heleysaa qeybta aruursita suxuunta muustikadaha Aduunka/Afrika ee dawaqa koowaad. Maktabkan wuxuu joogto u helaa jaraa'idka Warsan Times iyo majalooyin ku saabsan wararka Afrika.

Qeybta Caruurtana waa dawaqa koowaad waxaad kalood ka heleysaa sheyyo af-Soomaali ku qoron. Dhegeysiga sheeko caruureedka ee af-Soomaliga garaac 287-2605 ka dibna riix 3. 24 sacadood ayay kuu diyaar yihiin in aad dhegeysatid.

ISSUSOO ARRURINTA QEYBTA BARASHADA

Maktabada waxaad ka heleysaa cajalooyin la' dhegeysto, kuwa ladaawado oo fiidiyow ah, cajalo kumbuyuutur-ka loo isticmaalo, iyo buugaag loogu tala galey dadka rabo in ay bartaan afka-Ingriisiga ama doonaya in ay kororsadaan aqoontooda xirfada luqada af-Ingriisiga. Sheyada badankooda ee Maktabadaan waxaad ka heleysaa dawaqa labaad adigoo radinayaayo nambarka loogu yeero ee ah 428.